Ha u baranina cilmiga si aad ugu faantaan culimada ama ugu la murantaan dadka xun

Jaabir Binu Cabdullaahi Allaha ka raali ahaado isaga iyo ạbihiye waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Ha u baranina cilmiga si aad ugu faantaan culimada ama ugu la murantaan dadka xun ama in la idinku ixtiraamo, Qofka intaa suubiya Naartuu mudan Naartuu muda".
[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay Ibnu Maajah]

Nabiga Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ka digay in cilmiga loo barto in lagu faano ama in culimada lagula tartamo, ama si uu u muujiyo inuu culumo yahay, iyo in lagula murmo wax ma Garadka, iyo in loo barto in la xurmeeyo ama mudnaanta la siiyo. Qofka sidaa sameeya, wuxuu mudanayaa Naarta, waayo cilmiga Ilaahay darti loo barto ayuu u bartay istustus iyo ikhlaas la'aan.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY
لجنة الدعوة الإلكترونية
EDC E-Da'wah Committee